Dugsiga xannanada iyo barbaarinta carruurta waxa loogu talo galay ilmahaaga

Waraaqo ama buug yar oo ku saabsan qorshaha waxbarashada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ee carruurta

Skolverket

Dugsiga xannanada iyo barbaarinta acarruurta waxa
loogu talo galay ilmahaaga
Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada,
ayaa hubisey daabacaadda sannadkii 2007.
Waraaqahan ama buugan yar waxa laga dalban karaa:
Rugta adeegga macmiisha ee Fritzes
106 47 Istokhoom
Telefoon: 08-690 95 76
Faagas: 08-690 95 50
Boosta elektaroonigga: skolverket@fritzes.se

Lambarka dalbashada: 07:988

Habka garaafigga: Qoraal badan iyo hab (Mera text & form)
Turjumaanka iyo soo saarka originaalka ama asalka: Shirkadda Ord & Stil
Sawirrada: sawire Hans Alm/22tango
Daabacaadda: Gaafigga Lenanders

Adigu muhiim ayaad tahay

Adigaaga waalidka ah ayaa ilmahaaga ugu dhow. Sidaas awgeed ayey fikradahaagu micne weyn ugu fadhiyaan dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Haddii aad ka warranto fikradaha aad qabto waxa shaqaalaha u fududaanaya in ay siiyaan waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Si aad arrimaha ula socon karto waxna uga baddeli karto waxaad u baahan tahay in aad ogaato sida la doonayo in uu u socdo dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurtu.

Iyada oo loo socdo ujeeddo isku mid ah

Dawladda iyo golaha baarlamankuba waxay ansaxiyeen qorshe waxbarasho, kaas oo ay ku taallo qiimaha aasaasiga ah ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta iyo hadefka iyo shaqada uu hayo dugsigaas xannaanadu. Haddii aad akhrido qorshaha waxbarashada ee, Lpfö 98, waxaad ogaanaysaa waalid ahaan shuruudaha iyo waxaad ka filayso dugsiga.

Weliba degmedaaduna ujeeddooyin kale oo dhaafsan kuwa ku qoran qorshaha waxbarashada ayey yeelan kartaa. Degmada waxa ka jira guddi iyo maamul ka mas'uul ah dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Cinwaanka iyo lambaraka telefoonku wuxu ku yaalla buugga tusmada telefoonada iyo boggooada Internetka.

Dhammaan dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta ee degmooyinku waxay raacaan oo ay ku soconayaan qorshaha waxbarashada. Waxa kale oo weliba loo adeegsadaa si loogu qiimeeyo tusaale ahaan urur waalidiintu ay leeyihiin si uu u helo ruqsad ay ku bilaabaan dugsi xannaano oo gaar ah. Qorshaha waxbarashadu xitaa waxay noqon kartaa hoggaanka guriga xannaano maalmeed ee lagu hayo carruurta.

Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurtu caadi ahaan waa 1 ilaa 5 sano.

”Dugsiga xannaada iyo barbaarinta carruurtu waa in uu noqdaa mid fiican oo maad iyo qosol leh, badbaadsen oo aqoon ahaan u faa’ideynaya dhammaan carruurta ka qayb qaadanaysa”

Waxa laga soo qaatay qorshihii waxbarashada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee, Lpfö 98

Waxbarasho nolosha dheer oo tallaabo tallabo ah

Hawlaha dugsiga xannaanada iyo barbaraarinta carruurta waxa laga arkayaa cilmiga rabbaynta iyo waxbaridda taas oo daryeelka, xannaada, rabbaynta iyo barashadu ay samaynayaan qayb ama waax dhan. Taas oo ah in dugsiga xannaada iyo barbaarinta ugu horrayn loogu talo galay ilmahaaga awgii, iyo xitaa weliba in laguu suurta geliyo adigaaga waalidka ahi in aad shaqayso ama aad waxbarato.

Qorshaha waxbarashada waxa ku yaalla in ciyaartu ay muhiim u tahay horumarka iyo waxbarashada ilmaha. Carruurta waxa loo oggol yahay in ay tijaabiyaan oo tacbiirtooda ay u sheegaan siyaabo kale duwen, iyaga naf'ahaantooda iyo marka ay dad kale la joogaanba, tusaale ahaan iyaga oo isticmaalaya hees iyo muusig, sawir, qoob ka ciyaar, masraxiyad, hadal iyo qoraal. Horumarka luqadda ilmuhu waa qayb muhiim ka ah dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ee carruurta. Carruuraha kale ee ku hadla luqad kale oo aan ahayn iswidhish dugsiga ayaa mas'uuliyad gaar ahai ka saaran tahay.

Aasaaska shaqada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarintu waa mid dimuquraaddi ah. Carruurtu waxay baranayaan ixitiraamka ah in dhammaan dadku ay isku qiima yihiin. Shaqaaluhu waxay qadderinayaan carruuraha fikradahooga, danaha iyo waayo aragnimooyinka laga helo marka la qorshaynayo shaqo maalmeedka.

Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurtu waxa kale oo uu weliba joojinayaa oo ka hortagayaa doorarka jinsiyeed ee dhaqanka waxanu culayska weyn saarayaa arrimaha la xidhiidha deegaanka.

Dugsi kasta oo xannaano waa mid aad loo qiimeeyo

Qorshaha waxbarashadu waxay dammaanad qaadaysaa in dhammaan carruurtu ay helaan dugsiyo fiican oo isku mid ah, lyada oo aan loo eegayn meesha ay deggan yihiin. Maaddaama dhammaan dugsiyada xannaanada iyo barbaarintu ay leeyhiin qorshe waxbarasho oo isku mid ah, ayey leeyihiin ujeeddo isku mid ahna. Laakiin dhinaca kale habka ay u shaqeeyaan ayaa kala duwenaan karta. Qorshaha waxbarashadu kama hadasho sida dugsiga xannaanada iyo barbaarintu uu u qabto shaqada uu ku gaadhayo hadefkiisa, shaqaalaha ayaa iyaga oo kaashanaya waalidiinta iyo carruuta soo diyaariya. Waxa waafaqsan dugsi xannno iyo barbaarineed ayaa laga yaabaa in aanu waafaqin dugsi xannaano oo kale. Ma jirto koox carruur ah oo la mid ah koox kale.

Degmeda ayaa leh mas'uuliyadda hoose ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Halkaas ayaad la xidhiidhi kartaa haddii ay timaaddo dhibaato adiga iyo shaqaalaha ama maamulka dugsigu aad xallili kari weydaan.

”Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta, waxay carrruurtu kula kulmayaan dadka waaweyn ee arkaya fursadaha ilma kasta.”

Waxa laga soo qaatay qorshihii waxbarashada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee, Lpfö 98

Adigu saamayn ayaad ku yeelan kartaa

Qorshaha waxbarashada waxa ku yaalla in shaqada dugsiga xannaanada iyo barbaarinta loo qabto wada shaqayn kalsooni ah oo aad ugu dhow guriga. Sidaas awgeed ayey muhiim ugu tahay in aad la hadasho shaqaalaha haddii ay jirto wax aad doonayso in aad ogaato. Xilli fiicani waxa weeyi marka carruurta la dhiibayo iyo marka la soo kaxaynayo. Kolkaas ayey shaqaaluhu kaaga warrami karaan sida xaalka ilmahaagu uu ahaa intii maalinta uu joogey xannaanada. Waxa kale oo weliba aad ka warrami kartaa haddii wax gaar ahi ay dhaceen aroornimadii ama qoyska dhexdiisa, taas oo u fiicnaan karta in shaqaaluhu ay ogaadaan. Haddii wakhtigu aanu ku filnayn waxa laga yaabaa in aad go'aansataan wakhti aad maalin kale ku wada hadashaan.

Shaqaalaha ayaa habaynaya wadahadalka horumarinta, kolkaas oo aad ka wada hadlaysaan sidii uu ilmahaagu uga heli lahaa horena ugu mari lahaa iyo sidii dugsiga xannaanadu uu u shaqayn lahaa . Qorshaha waxbarashadu wuxu taageero fiican u noqon karaa wada hadlkiina.

Marka shaqaaluhu uu qorshaynayo shaqada waxay tixgelin siinayaan fikradahaaga iyo fikradaha waalidiinta kale. Waxa kale oo weliba laguu oggolyahay in aad la socoto oo aad qiimayso hawsha la qabanayo.

Miyaad dooneysaa in aad wada akhrido qorshaha waxbarashada oo dhan?

Wuu yaallaa dhammaan dugsiyada xannaada iyo barbaarinta carruurta. Waxaad buugaagta ama waraaqahan ka dalban kartaa shirkadda Fritzes, telefoonka: 08-690 91 90. Qorshaha waxbarashada waxaad weliba ka helaysaa bogga Internet ee hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada xagga hoose ee cinwaanka qawaaniinta iyo sharciyada.

Cinwaanku waa www.skolverket.se

Skolverket

www.skolverket.se